

WAA MAXAY SOO KABASHO?



Soo kabashadu kuma koobna oo keliya joojinta isticmaalka daroogada.

Waa safar qofeed oo qoto dheer oo ku saabsan in qofku naftiisa barto, horumar sameeyo, dibna u helo caafimaad iyo nolol deggan. Soo kabasho guul leh qof walba si kala duwan ayay ugu muuqataa.

DAAWAYNTA IYO SOO KABASHADA

Daaweyntu waxay ka kooban tahay habka looga xoroobo khalkhalka isticmaalka maandooriyaha, oo ay ku jiraan daaweynta caafimaad iyo barnaamijyada sida MOUD, iyo taageerada dadka isku waayo-aragnimada ah. Halka soo kabashadu tahay safar nololeed oo dheer oo lagu gaarayo caafimaad iyo xasillooni.

SOO KABASHADU QOF KASTA WAY U GAAR TAHAY

Ma jiro hal hab oo qof walba ku habboon. Soo kabashadu waa geeddi-socod nolosha oo dhan socda waana in lagu saleeyaa baahiyaha iyo yoolalka qof kasta.

SOO KABASHADU WAXAY KU SAABSAN TAHAY XASILLOONI

Soo kabashadu mar walba macnaheedu ma aha in qofku gebi ahaanba joojiyo isticmaalka maandooriyaha. Waxay sidoo kale ku saabsan tahay in qofku helo nolol deggan oo caafimaad leh, taas oo ka wanaagsan nolosha uu ku noolaan karo marka uu la tacaalayo khalkhalka isticmaalka maandooriyaha.

SOO KABASHADU MAR WALBA TOOS UMA SOCOTO

Dadka soo kabanaya badankood mararka qaarkood waxay la kulmaan dib-u-dhac. Laakiin haddii qofku barto inuu garto calaamadaha digniinta oo uu yeesho habab wanaagsan oo uu dhibaatooyinka ugu wajaho, waxay ka caawin kartaa inuu ka fogaado dib ugu noqoshada isticmaalka oo uu sii wato safarkiisa soo kabashada.

SOO KABASHADU WAXAY KU XOOGAYSATAA TAAGEERADA

Ceebaynta iyo takoorka bulshada ayaa dadka ku adkayn kara inay caawimaad raadsadaan. Fahamka asalka qofka, taariikhdiisa, iyo yoolalkiisa waa hab awood badan oo lagu taageeri karo soo kabashadiisa guul leh.

SOO KABASHADU MARNA MA DHAMAATO

Soo kabashadu waa geeddi-socod nolosha oo dhan socda, waxayna qayb ka noqotaa aqoonsiga iyo hab-nololeedka qofka. Si kasta oo ay dadka dibadda ka jooga ugu muuqatodadka ku jira soo kabashadu waxay si wanaagsan uga shaqaynayaan sidii ay ugu noolaan lahaayeen nolosha ugu wanaagsan ee ay awoodaan.

